Region Stockholm

# Doorashada gobolka ee 2026

13ka sebtembar 2026 waxaa la dooran doonaa xubnaha golaha gobolka. Markaad codkaaga dhiibato, waxaad ka qayb qaadanaysaa go'aaminta siyaasiyiinta maamuli doona Gobolka Stockholm afarta sano ee soo socota.

**Muxuu ku saabsan yahay doorashada gobolku?**

Doorashada gobolku wuxuu ku saabsan yahay arrimo saamaynaya nolol maalmeedkaaga. Gobolka Stockholm wuxuu mas'uul ka yahay daryeelka caafimaadka, gaadiidka dadweynaha, horumarinta gobolka, wuxuuna gacan ka geystaa nolosha dhaqanka ee gobolka.

**Sidee ayuu codkaagu saameyn u yeelan karaa?**

Markaad codkaaga dhiibato, waxaad saameyn ku yeelanaysaa xisbiyada iyo siyaasiyiinta maamuli doona Gobolka Stockholm. Siyaasiyiinta golaha gobolku waxay go'aamiyaan waxaa ka mid ah:

- sida lacagaha Gobolka Stockholm loo isticmaalo
- Inta ay noqonayso canshuurta gobolku
- sida daryeelka caafimaadka iyo gaadiidka dadweynaha loo horumarin doono
- siyaasiyiinta xubnaha ka noqonaya guddiyada ama agaasinka kala duwan.

**Yaa codbixin kara?**
Waxaad xaq u leedahay inaad codka ka bixiso doorashada gobolka haddii aad:

- aad buuxisay 18 sano ugu dambayn maalinta doorashada,
- aad tahay muwaadin iswiidhish ah oo ka diiwaangashan gobolka Stockholm ama
- aad tahay qof muwaadin ka tirsan waddan EU ka mid ah, Iceland ama Norway oo si rasmi ah uga diiwaangashan gobolka Stockholm, ama
- inaad tahay muwaadin u dhashay waddan kale, ama qof aan dhalasho lahay, isla markaana aad ku qorneyd diiwaanka dadweynaha ee Iswidhan ugu yaraan saddex sano oo xiriir ah ka hor maalinta doorashada, sidoo kalena aad ku qoran tahay diiwaanka gobolka Stockholm.

Xeerarku waxay khuseeyaan labadaba, qofka ku nool Iswiidhan iyo qofka waddan dibadda ah ku nool laakiin weli si rasmi ah uga diiwaangashan Iswiidhan.

**Sidee ayey doorashadu u dhacdaa?**

Waad codeyn kartaa waqtiga rasmiga ah  ka hor laga bilaabo 26ka agoosto ilaa maalinta doorashada.

Doorashada golaha gobolku waxay dhacdaa 13ka sebtembar,iyadoo ay isku mar yihiin doorashada baarlamaanka iyo doorashada  degmooyinku.

Marka codbixintu dhammaato, waxaa bilaabma tirinta codadka. Marka hore waxaa la tirinayaa codadka doorashada baarlamaanka, kadibna doorashada golaha degmada ugu dambayna doorashada golaha gobolka. Natiijada hordhaca ah ee doorashada waxaa isla habeenkaas lagu daabacayaa bogga websaydka ee Hay'adda doorashooyinka, oo ah val.se.

Hay’adda maamulka gobolka ayaa tirisa codadka, xaqiijisa natiijada doorashada, isla markaana qaybiya kuraasta golaha gobolka.

Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan doorashada bogga webdaydka ee Hay’adda doorashooyinka (Valmyndigheten).